



# Xeerka Arday Walba Wuu Guuleystaa (ESSA, Every Student Succeeds Act) ee Washington

## [Hagaha Waalidka]

### Waa maxay ESSA?

Markii lagu jiray 2015, Kongareesku wuxuu ansixiyey Xeerka Arday Walba Wuu Guuleystaa, oo beddelay Ma Jiro Canug Looga Tagay Gadaal. Sharciga wuxuu ka shaqeyaa inuu iftiimiyo galdaloolada waxqabadka ee u dhexeeyo kooxaha ardayda ee ka jira dugsiyadeena. Halkan OSPI, waxaanu la shaqeynay boqollaal daneeyayaal si aanu u abuurno Qorshaha La Xoojiyay ee ESSA, kaas oo aan u gudbinay Waaxda Waxbarashada faderaalka Sebteembar 18, 2017.

### Maxay ESSA gaar la tahay?

Isbeddelka ugu muhiimsan waa midda aanu siinayno taageero dheeraad ah dugsiyada dhibaatoonayo. Waqtigii la soo dhaafay, dugsiyada dhibaatoonayo waxay lahaayeen qaabab xaddidan oo ay ugu isticmaalaan khayraadkooda hagaajin. Wakhtigan la joogo, dugsiyadu waxay u leeyihiin dabacsanaan badan inay fullinayaan xeelado caddeyn ku saleysan oo loogu talagalay inay caawiyaan sare u qaadidda waxqabadka dugsiyada oo dhan iyo si loo taageero kooxo gaarka ah oo ardayda ah kuwaasi oo u baahan caawin dheeraad ah si ay u guuleystaan.

### Maxaa sidii sii ah?

Sida nidaamka wakhtigan shaqeyaa oo kale, ESSA wuxuu u baahanyahay in ardayda ay qaataan qiimeynaha fasalada 3–8, iyo markale fasalka

10aad. Waxay sidoo kale uga baahantahay in goboladu isticmaalaan heerarka casharrada waxbarashada loolanka leh.

### Sidee ayay ESSA u xirtaa galdaloolada?

Qorshaha ESSA ee Washington wuxuu tilmaamaa hindisayaal lagu soo jiidanayo laguna haysanayo macallimiinta wax-ku-oolka ah, gaar ahaan loogu talagalay ardayda aan caddaanka ahayn iyo ardayda saboolka ah, kuwaas oo inta badan ay wax baraan macallimiin aan waayo-arag ahayn, ama dhiga maaddooyinka aanan loo tabobarin. Intaa waxaa dheer, marka la eego ESSA, waxaanu ogaan doonaa dugsiyo badan oo leh galdaloolo waawayn waxqabadka ardayda oo u dhexeeyo kooxaha ardayda. Marka la ogaado (dhibtaas) waxa imanaysa maalgalin bartilmaameedsan iyo taageero kale si ay uga caawiyaan yareynta iyo ugu dambeyntii baabi'inta galdalooladaas.

### Sidee ayuu isu beddelayaa nidaamkeena isla xisaabtanku?

ESSA waxay u oggolaatay OSPI in dib loo qoro nidaamka isla xisaabtanka faderaalka ee Washington. Tasmadeena cusub waxay yareysaa kalsoonida aynu siinayno qiimeynaha gobolka ee heerka sare ee lagu cabbiro dugsiyada, iyada oo sidoo kale loo qabanayo dugsiyada masuuliyadda koboca ardayda, heerarka qalinjabinta, horumarka

Ardayda Ingiriisiga barata, iyo tilmaamayaasha jawiga dugsiyada. Tasmada cusub waxaa loo helayaa waaladiinta iyo qoysaska Gu'ga 2018



*ee dhammaan ardayda waxay ku helaan adeegyada Title I, Qaybta A ee ESSA*

### Macluumaad Dheeraad ah

- [Qorshaha La Xoojiyay ee ESSA ee OSPI](#)
- [Dulmarka Qorshaha La Xoojiyay](#)
- [Websaydka ESSA ee OSPI](#)
- [Warsaxaafadeedka OSPI](#)
- [Qoraalka buuxo ee Xeerka Arday Walba Wuu Guuleystaa](#)

### Macluumaadka Xiriirka

**Michaela Miller, Ed.D., NBCT**  
Ku-Xigeenka Kormeeraha Guud  
360-725-6343  
[michaela.miller@k12.wa.us](mailto:michaela.miller@k12.wa.us)

**Gayle Pauley**  
Caawiyaha Kormeeraha Guud  
360-725-6170  
[gayle.pauley@k12.wa.us](mailto:gayle.pauley@k12.wa.us)